Somali

Holstep Health

Ra'yiga foomka

# Ra'yigaaga muhiim buu noo yahay

Samee cabasho, nala wadaag fikirkaaga ama waad na bogaadin kartaa



## Foomka aragti dhiibashada

Nala wadaag fikirkaaga Ku soo celi foomkan xafiiska annaguna waan kuu soo jawaabi doonaa (haddii aad rabto inaan kuu soo jawaabno).

Taariikhda:

Goobta:

Magaca/adeegga barnaamijka:

Maxaad jeclaan lahayd inaad noo sheegto?

Maxaad jeclaan lahayd inaanu samayno ama aad rabi lahayd inay dhacaan?

Ma jeclaan lahayd inaan kula soo xiriirno si aan arrimahan kaala hadalno? **HAA** ☐ **AYA** Qa☐b taleefan ah lim☐l Waraaq ☐ ☐

Magacaaga: ............ Taleefankaaga: ............

Iimaylkaaga: ............

Address ka waraaqaha laguugu soo diri karo: ............

Ma jeclaan lahayd in turjubaan laguu qabto? **HAA** ☐ **AYA** ☐ Luuqada aad doorbidayso: ............

Holstep Health
Community care. For life.

holstephealth.org.au

# Waxaan halkan u joognaa inaan ku dhageysano

## Ra'yigaaga oo aad nala wadaagto ayaan wax ku wanaajin karnaa. Ra'yigaaga muhiim buu noo yahay

Waxaad noogu soo sheegi kartaa fikirkaaga siyaabo kala duwan.

- **Waxaad la hadli kartaa** xubin ka tirsan kooxda
- Waxaad soo buuxin kartaa **Foomka ra'yi wadaagista** ka bacdina waxaad gacanta uga dhiibi kartaa qof jooga xafiiska hore ama waxaad ku ridi kartaa sanduuqa talo bixinta ee meel kasta oo meelaheena ka mid ah aad ka heli karto
- **Waxaad soo wici kartaa** kooxdeena tayada adoo ka soo wacaya (03) 9450 2000
- **Waxaad iimayl ku soo diri kartaa** iimaylkan ah quality@holstephealth.org.au

Waxaad caawimaad weydiisan kartaa qof ka tirsan kooxda ama qof kuu dooda haddii aad u baahan tahay caawimaad si aad ra'yigaaga noola soo wadaagto.



## Waxa aad filan karto marka aad nala wadaagto ra'yigaaga

Markaad nala wadaagto wax kasta oo ra'yigaaga ah, waxaad:

- filo inaad sii isticmaasho adeegyada ayadoo aysan wax saameyn ah ku yeelanayn adeegyadaada
- dooro inaan la ogaan qofka aad tahay
- caawimaad ka hel qof ku taageera ama kuu dooda
- hel turjubaan si aad noogu sheegto waxa aad rabto inaad noo sheegto
- mar walba naga hel jawaab, haddii aad rabto inaan kuu soo jawaabno.

Waxaan si dhab ah u qaadanaa dhamaan wixii ra'yi ah ee aad nalal soo wadaago waana kula shaqeyn doonaa si aan wax uga qabano waxyaabaha aad ka walaacsan tahay.

## Maxaa dhacaya markaad cabasho soo gudbiso ka dib?

- Waxaad heli doontaa jawaab aan kuugu sheegayno inay nasoo gaartay cabashadaadii
- Haddii aad rabto inaan kula soo xidhiidhno, waxaanu:
  - kugula soo xidhiidhi doonaa 7 maalmood gudahood markaan cabashadaada helno ka dib anagoona ku siin doona jawaab rasmi ah marka cabashadaada la xaliyo (taasoo qaadan karta ilaa 28 maalmood haddii ay yihiin arrimo culus)
  - marwalba waan kula soo socodsiin doonaa halka ay wax marayaan
  - cabashooyinka oo dhan waxaan u maareyn doonaa si xushmadi ay ku jirto waxwalbana ay sir ayay kuu ahaanayaan
  - Waxaan kugu xiri doonaa turjubaan, qof kuu dooda ama adeegyada kale ee taageerada, haddii loo baahdo.

## Haddii aadan ku faraxsanayn natiijada kasoo baxda cabashadaada

Fadlan nala wadaag wixii aad ka tabaneyso sida aan wax u xalinay. Haddii aadan weli ku qanacsaneyn, waxaa lagugu soo dhaweynayaa inaad la xiriirto Guddoomiyaha ay howshani khuseyso:

**Gudoomiyaha Cabashada Caafimaadka**

- Taleefanka: 1300 582 113, ama
- Khadka online-ka ah: hcc.vic.gov.au/make-complaint

**Guddoomiyaha Wanaajinta Caafimaadka Maskaxda**

- Taleefanka: 1800 264 054, ama
- Khadka online-ka: www.mhwc.vic.gov.au

**Gudoomiyaha cabashooyinka daryeelka da'da**

- Taleefanka: 1800 951 822
- Khadka online-ka: www.agedcarequality.gov.au/contact-us/complaints-feedback/how-make-complaint-or-give-feedback

**Guddiga Adeegyada Sharciga ee Victoria iyo Guddoomiyaha**

- Taleefanka: (03) 9679 8001 or 1300 796 344
- Khadka online-ka: lsbc.vic.gov.au/consumers/complaints/how-lodge-complaint

